WAA MAXAY WAXYEELADA CUNSURIYIINTA MIDIGTA FOG

Qofna looma cunsuriyadaynkaro sabab la xidhiidha midabkiisa , jidhkiisa ,wadankiisa, diintiisa ,qaab nololeedkiisa , dabeecadisa iyo dhaqankiisa . qofka adiga ku caaya ,ku cabsigeliya ,kuu hanjaba ama kula dagaalama wuxuu galay dembi .

Waxyeelada cunsuriyiintu geystaan waa dhibaato ay wax ku yeelayaan nabadgelyada bulshada yagoo waxyeelaynaya kana soo horjeeeda koox ama qayb ka mid ah bulshada taas oo lagu darayo:

- cunsurinimo iyo yuhuud nacaybnimo iyo islaan nacaybnimo
- Necbaansho dhaqanada kala duwan ee dhalinyarada
- Iyagoo neceb lidina ku ah bidixda ,dimuqraadiyada ,
- Necbaansho wadadegenaanshaha guryaha shaqola,aanta ,xanuunka iyo dadka baahiyaha gaarka qaba sida curyaaminta , naaafada
- Nacaybka khaniisiinta iyo khaniisadaha (dadka isku jismiga ah ee isu galmooda)

Go,aanka iyo malaynta aad u malayso dhacdo ama fal dambiyeed in ay yihhin cunsurinimo taasi waa garasho iyo aqoon ka timi maskaxdaada kolka aad falka ku metasho cunsiriyad ogow waxa la raba markhaati ,ama booliska noqonaya booska kowaad iyo ka labaad .

Opferperspektive
Beratung für Betroffene rechter Gewalt

Opfer perspektive
La talinta dhibanaha ay dhibaateeyen cunsuriyiinta midigta fog

Cinwaanka xafiiska :
Rudolf-Breitscheid-Straße 164
Cinwaanka boosta
14482 Potsdam

Taleefanka 03318170000
Fagiska 03318170001
Cinwaanka info@opferperspektive.de
Website www.opferperspektive.de

Taageero dhanka maaliyada:

TOLERANTES BRANDENBURG

CAAWİNTA
DHİBANAHA AY DHİBAATEEYEN
CUNSURİYİİNTA MİDİGTA FOG

La talin iyo la socodka dhibanaha iyo wareega saaxibtinimo sida markhaatiga

0331 8170000
www.opferperspektive.de

MAXAANU ANAGU ADIGA KU QABANKARNA

ANAGU ADIGA WAAN KU CAAWINAYNAA
Kolka adiga ama dadka kula nool ay cunsuriyiintu caayan ama aflagaadeyan ,la baqdin geliyo ,ama loo hanjabo, ama la weeraro anaga ayaa ku caawinayna , waxanu ku so diraynaa qof talo bixiye ah oo dhibkaa kugu dhacay kaacaawinaya .qofkaas oo kaa caawinaya sidii aad u waji lahayd dhibkan lagu gaystay iyo waxyaabaha aad xaqa u leedahay in aad samayso .la talintuna waxay noqonaysaa halmar .hadaad rabto waxaynu samayn karna marar badan oo la talin ah .dadka aan qaan gaadhin xataa way kusoo biiri karaan la talinta haddi aanay isfahmin qofka xanaaneeya.

XAQUUQDAADA
waxaanu ku sharxaynaa sida uu u socdo faldanbiyeedku .waxaanu ku raacayna booliska ,iyo maxkamada haddi lagaaga yeedho ,waxanu kaa caawinaynaa ama ku qabanaynaa looyar ama looyarad .

XAALADAADA BULSHO
Waxaanu ku sharxaynaa xaalkaaga waanuna ku caawinaynaa .waxaanu ka caawinaynaa sidii aad u helilahayd magdhow iyo lacagta dhiig baxa ,waxaanu kaloo ka caawinayna caymiska iyo suaalaha caymiska sida loo buuxsho.

CAAFIMAADKAAGA
Kolka aad dhaawacanto waxaanu kula garab istaagayna daaweyn dhakhtar waxaad kaloo anaga nagala hadli kartaa ama nagala sheekaysan kartaa cabsida ku haysaa , hadaad ubaahato dakhtar cilmi nafsi ahna waanu ku qabanaynaa .

BULSHADA KUGU XEERAN
Haddi aad rabto dhibaatada iyo khatarta cunsuriyada ee degaanka aad degantahay in si guud looga doodo si xal loo helo waxaanu ku keenaynaa cinwaanada iyo meelaha aad kala xidhiidhayso warbaahinta iyo ururada .

WAANU KULA TALINAYNAA.

GOOBTA AAD KU NOOSHAHAY
Waxaanu kugu imanaynaa meelkasta ,Degmo kasta iyo tuulo kasta oo aad ka joogto Gobolka Brandenburg si aan ku caawino

BILAASH AMA LACAGLA,AAN
Caawinta aan ku samaynayno waxaan kugu samaynaynaa si bilaaash ah .

AFAF/LUUQADO IYO LAHJADO KALA DUWAN
Haddi aad rabto turjubaan ama turjubaanad waxaan ku keenaynaa qof kugula hadla afkaaga Hooyo .

XORIYAD AMA SI MUTADAWACNIMO AH
Waxaad si xoriyad ah u dooranaysaa ugana fekeraysaa in aad u baahantahay latalin iyo weliba talaabada xigta aad qaadayso . anaguna waan kaa caaawinaynaaa.

KALSOONI
Waxkasta oo aynu inagu kuwada hadalo waxaa loo ilaalinayaa si sir ah ,anagoo kaa haysan ogolaanshiyo lagama yaabo in aan xogtaada iyo waxaynu ku wada hadalay in aan qof sadexaad iyo cidkale toona u sheegno .

MADAXBANAANI .
Caawintayadu way ka madaxbanaantahay xafiiskasta oo dawladeed .

WAA KUWAMA OPFERPERSPEKTIVE ?

Todobaadkasta dadbaa la garaaca ,la weeraraa sababtoo ah sawirka cunsuriyiintu aduunka ka haystaan bayna ku so baxayn .dadka dhibaatadu la kulantay maalinkasta waxay dareemaan bilaa nabadgelyo,ama bilaa amaan .xataa marka laga soo wareego mudo badan markii ay dhibka cunsuriyadu ku dhacday,dhiba-naha cunsiriyada la kulmay wuu cabsanaya ,cabsiduna isaga ama iyada keliya bay keli ku ahaan .

Kala duwaananshaha dadka waxay sinaysaa cunsuriyiinta midigta fog ee dhibaatada geysta in ay aaminaan in ay iyagu badan yihiin .taasina waxay keentay in la sameeyo fikir ka soo horjeeda kooda daboolkana ka jabsha aamusnaan qofka dhibaatadu qabsatay yadoo la abuurayo jawi bulsho kuna salaysan in dadkoo dhan ay xor u noolaadan yagoo aan wax cunsuriyad ah ka cabsanayn .taasina waa hadafkayaga .

Ururka opferperspektive wuxu u samaynaya dhibanaha la kulmay dhibaatada cunsuriyiinta midigta fog ee ku nool gobolka Brandenburg la talin iyo u raacida meelkasta sida maxkamada iyo booliska .Opferperspektive wuxu ku fasiraya ama ku sharxaya waxa cunsuriyadu midigta fog tahay wuxuna la fadhiisanayaa uguna tagaya goobtisa qofkasta oo la kulma cunsuriyadayn .Ururkani waa mid aan ahayn faaido doon waxana lagu maal galiyey barnaamijka la dhaho *Förderung von beratungsnetzwerken * waana koox wareegaysa oo faragelinaysa kana soo horjeeda cunsuriyiinta midigta fog .Tabaruckasta wuu nacaawinaya hadaad rabto in aad na caawiso koonta hoos ku qoran noogusoo dir wixii tabarucaada .

Koontada tabarucaadka 3813100
Bank für Sozialwirtschaft
IBAN: DE34100205000003813100
BIC: BFSWD33BER